Hiigsigeenna

In aynu nolosha wax-ka-beddelno anagga oo bixinayna taageero oo dhiirrigelinayna iskaashiyada awoodda u siinaysa dadka in ay ku noolaadaan nolosha ay rabbaan.

Qiyamkeenna

Ixtiraam lagu helo tooska aqoonsashada muhiimada ay leeyihiin dhammaan dadka oo dhan;

Qorshaha Khuseeya-Qofka si loogu taageero qof kasta in uu gaaro awoodiisa ama awoodeeda buuxda;

Iskaashato u dhaxaysa macamiisha Maamulka Naafada Koritaanka, qoysaska iyo daryeel bixiyayaasha, si loo horumariyo loona joogteeyo taageerooyinka iyo adeegaha loo baahanyahay lana doonayo;

Kaqayb qaadasho Bulsho ayada oo awood loo siinayo dadka qabba naafada koritaanka in ay qayb ka noqdaan shaqaalaha kuna lug lahaadaan xubnaha bulshada.

Himiladeenna

In aynu ku taageerno shakshiyaadka in ay ku noolaadaan, in ay gacan ka geystaan, oo ka-qayb qaataan bulshadooda;

Taageero horumarin joogto ah oo la siiyo qoysaska carruurta iyo dadka waaweynba;

Taageero gaar ah kuwaas oo awood u siin doona dadka qaba naafada koritaanka si ay dibada ugu soo saaraan awoodahooda ee ku duugan;

Dhisida qorsheyaal taageero oo ku salaysan baahiyada iyo awoodaha qofka iyo qoyska; iyo

Ka qaybqaadashada shakhsiyaadka, qoysaska, bixiyayaasha adeega deegaanka, la-hawlgalayaasha dowladeed ee bulshada iyo daneeyayaasha kale si loo waddo horumarinta nidaamkeena taageero.

Nala soo xiriir

Internet-ka nagu soo booqo:
dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request]

Xafiiska halkan ka raadi:
dshs.wa.gov/DDA/dda/ find-an-office

Na soo wac:

Degmooyinka	Teleefoonka
Chelan, Douglas, Ferry, Grant, Lincoln, Okanogan, Pend Oreille, Spokane, Stevens	(800) 319-7116
Adams, Asotin, Benton, Columbia, Franklin, Garfield, Grant, Kittitas, Klickitat, Walla Walla, Whitman, Yakima	(866) 715-3646
Island, San Juan, Skagit, Snohomish, Whatcom	(800) 567-5582
King	(800) 974-4428
Kitsap, Pierce	(800) 735-6740
Clallam, Clark, Cowlitz, Grays Harbor, Jefferson, Lewis, Mason, Pacific, Skamania, Thurston, Wahkiakum	(888) 707-1202

Dadka u baahan taageero lagu taageero maqalka ama xiriirka waxay wici karaan Adeega Xoojinta Xiriirka Teleefoonka Washington ayaga oo garaaca 7-1-1 ama 1-800-833-6388 (TTY).

Waa siyaasada Waaxda Adeegaha Caafimaadka iyo Bulshada in aanan dadku loogu midab takoorin (shaqaalaynta ama adeega) sabab laxiriirta jinsiyad, midab, caqiido, diin, asal dhallasho, u jiheyn galmo, da', nooc, jiritaanka wax xubnaha dareenka ah, naafo jireed ama maskax, isticmaalid hagid loo adeegsado eey tababaran ama adeeg xayawaan oo uu isticmaalo qof qabba naafo ama xaalad askari hore ah.

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

DSHS 22-722 SM (Rev. 9/18) Somali

Haggid loogu talogalay Adeego, U qalmid iyo Taageerooyin

Washington State Department of Social & Health Services
Transforming lives

Maamulka Naafada Koritaanka

U qalmitaanka Maamulka Naafada Koritaanka

Codso u qalmitaanka Maamulka Naafada Koritaanka (DDA) haddii adiga ama ilmahaaga uu qabbo mid kamid ah xaaladahaan hoose.

Da'da u qalmitaanka	0-3 sano	4-9 sano	10-17 sano	18 iyo ka weyn
Hal Dib-u-dhac Koritaan Ah	✓			
Saddex iyo ka baddan oo Dib-u-dhacyo Koritaan ah	✓	✓		
Naafonimo maskaxeed		✓	✓	✓
Maskax Suux		✓	✓	✓
Qallal		✓	✓	✓
Maskax Dhimanaan		✓	✓	✓
Dareemeyaal kale, ama xaalad Kale oo la mid ah Naafonimada Maskaxeed		✓	✓	✓

Si laguu arko in aad u-qalanto DDA waa:

- In aad ahaatid qof deggan Gobolka Washington,
- In aad haysatid caddeynta u qalmitaan naafada koritaanka oo bilaabatay ka hor da'da 18, iyo
- In aad haysatid caddeyn ku saabsan xaddidaad la taaban karo ama muhiim ah.

Ka baro in baddan oo ku saabsan u qalmitaanka Maamulka Naafada Koritaanka halkan: www.dshs.wa.gov/dda/consumers-and-families/eligibility

Hadaad rabto macluumaad dheeri ah, ka booqo bogga internetka Maamulka Naafada Koritaanka (DDA) halkan:
www.dshs.wa.gov/dda

Maxay yihiin qaar ka mid ah adeegyada uu bixiyo Maamulka Naafada Koritaanka?

- Soo dhexgalka xilliga hore ah oo loogu talogalay carruurta laga bilaabo marka ay dhashaan illaa ay ka gaaraan saddex jir
- Daryeelka shakhsi ahaaneed iyo daryeelka gargaarka
- Daryeelka ku meel-gaarka ah
- Qaadashada xirfadaha tababarka
- Tiknoloojiyada caawimaadda ah
- Jawaabta xaalada deg-dega ah ee Shakhsiyeed
- Tababarka maamulka daryeel bixiyaha
- Adeegaha kala guurka ee bulshada
- Ergay kalkaalanimo
- Taageerooyinka shaqaalaynta
- Gelida bulshada
- Hagaajinta gaariga iyo guriga
- Qalabka iyo alaabta
- Dharka gaarka ah
- Taageero hab-dhaqan iyo la-talin
- Kalkaalin
- Ka-qaybgalka bulshada
- Adeegyada deegaan
- Adeegyada ka hortaga dhibaatooyinka, wax-ka-qabashada iyo xasilinta
- Qorshaha khuseeya-qofka
- Waalidnimada la taageero ee loogu talogalay macmiilka
- Ilaalinta kuwa isku-faca ah

Ka-qaybqaadashada laga qayb qaato adeegaha Maamulka Naafada Koritaanku waa mid iskaada ah

Maamulka Naafada Koritaanka wuxuu ku dadaalaa hirgelinta siyaasadaha dadweynaha ee kor-u-qaadaya qiimaha qofka, ixtiraamka, iyo sharafta uu qof kasta mudan yahay si shakshi kasta loo qiimeeyo oo loo arko in uu yahay xubin ka tirsan bulshada oo wax-ku-soo-biiriya. Maaliyadaha federaalka iyo gobolka ayaa la isticmaalaa si loo bixiyo taageerada iyo adeegyada loogu talogalay qofka u qalma iyo qoysaskooda. Khayraadku waa kuwo xaddidan adeegyada loo baahan yahayna ma waxaa laga yaabaa in marwalba aan la heli karin.

Helida adeegyada waxaa ay ku xiran tahay:

- Ka soo bixida shuruudaha u qalmitaanka loogu talogalay adeegga gaarka ah,
- Baahi la qiimeeyay oo loogu talogalay adeegga, iyo
- Maaliyadaha la heli karo ee adeegga.

Su'aalaha inta baddan la isweydiiyo

Sideen u codsadaa u qalmitaanka Maamulka Naafada Koritaanka ama haddii aan horeba u ahaa macamiil Maamulka Naafada Koritaanka ah, sideen u codsadaa adeegyada?
Naga soo wac mid ka mid ah lambarada ku xusan buugyarahan ama online-ka halkan ka gal: www.dshs.wa.gov/dda/service-and-information-request.

Sideen ku heli karaa daryeel-bixiye?
Jawaabta: La xiriir maamulaha kiiskaaga. Waxaa ay ku siin karaan liisas ay ku qoran yihiin daryeel bixiyayaasha u qalma ama waxaa ay kuu soo bandhigayaan qalab wax lagu raadiyo si aad u oggaatid meesha laga helo daryeel bixiyayaasha u qalma ee jooga deegaankaaga.

DDA ma bixisaa adeegyada xaaladaha degdegga ah/dhibaatooyinka?
Haddii aad ku jirtid hawsha codsashada u-qalmitaanka Maamulka Naafada Koritaanka, Maamulka Naafada Koritaanka wuxuu awoodi karaa in uu kugu caawiyo macluumaadka wareejinta iyo helida adeegyada qaarkood inta dib-loo-eegayo codsigaaga. Haddii aad hore u ahayd qof u-qalma Maamulka Naafada Koritaanka, la xiriir maamulaha kiiskaaga.

Waa maxay taageerada ay heli karaan carruurta da'doodu ay ka yar tahay saddex sano?
Waxqabashada xilliga hore ayaa loo bixiyaa sida qayb ka mid ah barnaamijka Taageerada Xilliga hore ee loogu talogalay Dhallaanka iyo kuwa socod baradka ah iyada oo iskaashi lala sameeyo Waaxda Waxbarashada Xilliga hore iyo wakaaladaha horumuudka deegaanka. Si aad u oggaatid in badan ka wac Khadka Marwalba Shaqeeya ee Caafimaadka Qoyska lambarkan (800) 322-2588 ama online-ka ka gal halkan: Parenthelp123.org. Weydii maamulaha kiiskaaga haddii la heli karo adeegyo kale.